

MUUJINTA AQOONTA XIRFADEED

HAGIS LOOGU TALAGGALAY GOOBAHA SHAQADA

Shuruudaha shahaadada waxbarashada xirfadeed waxaa ka qayb ah muujinta awoodda xirfadeed iyo tan waxbarasho, iyadoo la samaynaayo howlo shaqo oo dhab ah oo qofku uu ku shaqaynaayo xaalado dhab ah iyo howl shaqo oo nidaam ku socota, ama imtixaanka shahaadada xirfadda (näytö). Waxbarashada ardayda waxaa qiimeynaaya wakiilka nolasha shaqada iyo macallinka.



SIDAAN SOO SOCOTA AYAAD KU NOQON KARTAA QIIMEEYE GUULAYSTAY

- Inaad tahay xirfadle yaqaanna laantiisa xirfadeed ee u gaarka ah
- Inaad tahay mid u kuurgalay qaybaha shahaadada ee ku saabsan waxyaabaha la doonaayo ee aqoonta xirfadeed iyo arrimaha lagu saleeyay qiimeynta



- Imtixaanka shahaadada oo ah mid hore loo sii qorsheeyay. In howlaha wax ku oolka ah ay yihiin kuwo suuraggalinaaya muujinta aqoonta xirfadeed, sida ku cad waxyaabaha aasaaska u ah shahaadada imtixaanka. Qaybaha ka midka ah kuwaas ee aan suuraggalka ahayn in sidaas lagu muujiyana, waxaa loo qorsheeyay qaabab kale ee loo muujin karo aqoonta xirfadda.

- Inaad tahay mid u kuurgalay howshaada la xiriirta qiimeynta
- Inaad wadashaqayn la yeelato ardayga iyo macallinka ka hor imtixaanka shahaadada xirfadda, xilliga lagu gudajiro iyo kadib
- Xiriirka ka dhexeeya qaybaha kala duwan inuu yahay mid firfircoon, xirfad ku salaysan oo horumarin leh.
- Inaad u kuurgashay suuraggalnimada ah in sharci ahaan ay kaa reeban tahay ka qaybqaadashada arrinkaan, sida uu dhigaayo sharciga maamulka ee tirsigiisu yahay (Hallintolaki 27-29 §)



01

QORSHAYNTA IMTIXAANKA SHAHAADADA

Haddii loo baahdo waxaad ka qaybqaadataa tababarka qiimeynta, kaasoo macaahiddu ay qabanqaabinayaan.



Waxaad hubisaa xilliga im-tixaanka shahaadada, qabanqaabinta wax ku oolka ah iyo uruurinta xogaha qiimeynta ee suuraggalka ah.

Isla hal qof ayaa wuxuu noqon karaa hagaha goobta shaqada iyo qiimeeyaha muujinta aqoonta xirfadeed, marka uu ka fekeray arrinka ku saabsan in sharci ahaan ay kaa reebban tahay ka qaybqaadashada arrinkaan.

U kuurgal qorshayaasha iyo heshiisyada, kuwaasoo muujinta aqoonta xirfadeed ee la xiriirta la sameeyay.

Waxaad u kuurgashaa qaybaha im-tixaanka shahaadada iyo arrimaha lagu saleeyay qiimeynta, kuwaasoo ardaygu uu ku muujinaayo aqoontiisa xirfadeed.

Hal im-tixaan oo ah kan shahaadada ayaa lagu muujin karaa dhowr qaybood oo ka mid ah muujinta aqoonta xirfadeed, marka ay muujinta aqoonta xirfadeed ay muuqato, islamarkaana muujinta aqoonta xirfadeed ay tahay mid si isku mar ah loo qorsheeyay dhowr qaybood oo ka mid ah qaybaha shahaadada im-tixaanka.

Qayb ka mid ah im-tixaanka shahaadada waxaa dhici karta in hal mar ama dhowr mar lagu muujin karo im-tixaanka aqooneed. Waxaa suuraggal ah in im-tixaanka aqooneed laga sii wado goobta shaqada ee kale, si loo xaqiijiyo dhammaystirnaanta muujinta aqoonta xirfadeed, islamarkaana qiimeyntu ay u noqoto mid lagu samayn karo si kalsooni leh.

02

QIIMEYNTA MUUJINTA AQOONTA XIRFADEED

U qiimee aqoonta xirfadeed si dhinacyo badan leh iyo qaabab kala duwan, tusaale ahaan u kuurgelid, wadahal, iyo in aad fahamto dukumintiyada iyo xogaha ka soo baxay aqoontaas xirfadeed.

Ardayga waxaad siisaa fursadda ah inuu qiimeyn ku sameeyo fahamkiisa iyo kartidiisa gaarka ah ee im-tixaanka. Is qiimeynta ma ahan mid saamayn ku yeelanaysa muujinta aqoonta xirfadeed iyo dhibcaha maaddooyinka.

is barbardhig arrimaha qiimeynta iyo darajooyinka aqoonta xirfadeed ee salka u ah im-tixaanka shahaadada.



Shahaado xirfadeedka aasaasiga ah Qaybaha shahaado xirfadeedka ah ee muujinta aqoonta xirfadeed la ansixiyay, waxaa qiimeynteeda lagu sameeyaa darajada ah 1-5.

Qayb ka mid ah muujinta aqoonta xirfadeed ee im-tixaanka shahaadada, waxaa laga dhegeysan karaa wakiilka nolosha shaqada.

Xirafadda- iyo shahaado xirfadeedka khaaska ah Qaybaha muujinta aqoonta xirfadeed ee im-tixaanka shahaadada waxaa lagu qiimeeyaa darajada ah, waa la ansixiyay-lama aqbalin.

Waxaad macallinka kala heshiisaa ka qaybqaadashada wadahalalka qiimeynta ama soo uruurinta maaddooyinka qiimeynta iyo sidii macallinka loogu gudbin lahaa.



03

GO'AAN KA GAARISTA QIIMEYNTA

Waxaad go'aanka qiimeynta isla gaartaan macallinka, xilliga lagu guda jiro wadahalalka qiimeynta.

Adiga iyo macallinku si wadajir ah ugu sheega ardayga, go'aanka qiimeynta iyo waxaad ku salayseen go'aankaas.



Hubinta iyo sixitaanka qiimeynta waxaa marka la samaynaayo la raaca hagista golaha waxbarashada.

Adiga iyo macallinka si wadajir ah go'aan uga qaata hubinta qiimeynta, iyadoo wax dib u dhac uusan dhicin

